HAGAHA CODEYNTA 2014

Shuruudaha Codeynta

- In aad waddani Maraykan ah tahay.
- Ugu yaraan ah 18 jir Maalinka Doorashada.
- Tahay deggane Minnesota muddo 20 cisho.
- Qancisay qaybaha shuruudaha idil ee xukun dembi culus.
- Waxa aad codeyn kartaa adiga oo uu qof korka kaa ilaalinayo waa haddii uusan qaali ka xaayuubin xaqa aad dooraashada u leedahay.

Taariikhaha Ahmiyadda Leh 2014

- Juun 27 – Waxaa diyaar ah warqadda codeeyaha doorashada ka maqan
- Luulyo 22 – Maalinka kamadambeysta ee isdiiwaangelinta ee Doorashada Hore ee Is-reebreebka. Codeeyeyaasha waxaa kale ay iska diiwaangelin karaan rugta doorashada isla Maalinka Doorashada.
- Agoosto 12 – Doorashada hore ee Is-reebreebka.
- Sateembar 19 – Waxaa diyaar ah warqadda codeeyaha doorashada ka maqan.
- Oktoobar 14- Maalinka kamadambeysta ee isdiiwaangelinta hore Maalinka Doorashada. Codeeyayaasha waxaa kale ay iska diiwaangelin karaan rugta doorashada isla Maalinka Doorashada.
- Nofeembar 4 – Maalinka Doorshada Guud.

Isdiiwaangeli

Si aad Minnesota uga codeysid, waxaa shardi ah in aad isdiiwaangelisid – eeg halka ay isdiiwaangelintaada ku suguntahay adiga oo galaya mnvotes.org.

Waxa aad is horraansho isdiiwaangelin kartaa ugu yaraa saddex toddobaad ee ka horreeya Maalinka Doorashada, ama iska diiwaangeli rugtaada doorashada isla Maalinka Doorashada. Waa aad si horraansho ah iska diiwaangelin kartaa internetka, ama aad foomka isdiiwaangelinta boostada ugu dirtid xafiiska doorashada degmadaada.

Waxaa shardi ah in dib isu diiwaangelisid markasta ee baddalatid meesha cinwaanka kuu ah, magacyada ama muddo affar sano ah ee isku xigta aadan ku coddhiiban.

Xog-ogaal Noqo

Baro Waxa Warqadda Codeynta Ku Qoran

Ka eeg sambalkaaga codeynta mnvotes.org waxna ka baro musharixiinta iyo arrimaha aad la warhayo.

Xaggee Laga Codeynayaa

Goobaha doorashada ka eeg mnvotes.org, ama la xariir hantidhowraha degmadaada ama karraaniga dawladda hose.

Goobaha doorashada waa ku si fudud uu qof kasta ku tegi karo meelaha dadka ay marayaanna leh calaamado iyo boosas u gaar iyo sida lagu tegayo meelaha laga coddhibanayo. Haddii aadan gaarigaaga ka soo bixi karin si aad ku gashid goobta doorashada, garsoorayaasha doorashada ayaa meesha aad joogtid kuugu keeni doona warqadaha doorashada.

Saacadaha Doorashada

Goobaha doorashada badankood ayaa furan 7da subaxnimo, waxaana shardi ah in 8da fiidnimo la xiro. Dadka safka ku jiray wixii ka horreeyay 8da fiidnimo xaq ayay u leeyihiin coddhiibtaan.

Xaqa Fasaxa Codeynta Loogu Leeyahay Shaqada

Sharciyan, shaqaalaha waxa shaqada ka qaadan karaan fasax ayadoo ay mushaarka uu u socdo si ay ku codeeyaan.

Kaalmaynta Codeyaha ee Goobaha Doorashada

Codeeyeyaasha waxa ay xaq u leeyihiin in ay caawimaad ka helaan garsooreyaasha doorashada ama qof ay ayaga doorteen, laga reebo wakiilka shaqaaleyahooda, ururkooda shaqaalaha ama musharax.

Coddhiibo Maalinka Doorashada

Isqor iyo Isdiiwaangeli Haddii Loo Baahdo

- Marka garsoore doorasho uu ku weydiin doono magacaaga iyo cinwaankaga. Haddii aad isdiiwaangelisay Maalinka Doorashada kahor, waxa aad ku jirtaa liistada codeeyaha waana isqori kartaa.
- Haddii aadan si horraansho ah isdiiwaangelin si aad u codeysid, waxa aad iska diiwaangelin karta goobta doorashada. Baro waxa ku taxluqa isdiiwaangelinta Maalinka Doorashada adiga oo galaya mnvotes.org.

Qaado Warqadda Doorashada

- Waxaa lagu siin doonaa marka aad isqortid ama isdiiwaangelisid. Waxa xiga in aad rasiidka u dhibtid garsooraha doorashada, kaaso ku siin doona warqadda doorashada kuuna sheegi doonaa sida rabo in loo calaameeyo. Garsooraha waxa uu ka jawaabi doonaa wixii su'aalo ah ee aad weydiiso kaddibna waxa uu kuu diri doonaa meel gaar oo xiran si aad u codeysid.

Buuxi Warqadda Doorshada

- Tusmooyinka warqadda doorashada ayaa ku sheegi doona inta musharixiin ee xafiis kasta aad u dooraneysid.
- Qaado waqti kugu filan ee aad si fiican wax ku kala eegto. Haddii aad qalad sameysid, weydiiso warqadda doorashada ee cusub.
- Codeeyeyaasha waxaa kale oo ay istimaali karaan caalaameeyaha qumaatiga (AutoMARK) oo ah aalad warqaddooda doorashada u calaameyneysa. AutoMARK waxa ay codeeyeyaasha fursad u siinaysaa in si xor ah iyo asturnaan leh u kala eegaan fursadaha ay warqadda doorashada ku calaameeyaan – sida farta waaweyn ee daabacan, aaladaha maqalka, batoonada ama shashadaha la taabanayo.

Horraansho Ku Codee adiga oo isticmaalaya Warqadda Codeeyaha Doorashada ka Maqan

Si horraansho leh ayaad ku codeyn kartaa adiga oo isticmaalya warqadda codeeyaha doorashada ka maqan – halka aad nafsi ahaantada ku codeyn lahayd Maalinka Doorashada. Waxa aad warqadda codeeyaha doorashada ka maqan ku codeyn kartaa xagga boostada ama adiga oo nafsi ahaantada taga goobta doorashada. Wax ka baro adiga oo galaya mnvotes.org.